

Ballaarinta helitaanka ay helayaan reer Alberta ee dakhligoodu hooseeyo gaadiidka dadweynaha

Sibtambar 26, 2023 [Su'aalaha warbaahinta](#)

Dawladda Alberta waxay bixinaysaa \$1.7 milyan si loo ballaariyo barnaamijyada gaadiidka loogu tala galay dadka dakhligoodu hooseeyo kuwaasoo laga hirgalinayo lix xaafadood oo cusub oo gobolka oo dhan ah.

Dad badan oo reer Alberta ah ayaa ku tiirsan gaadiidka dadweynaha si ay ugu tagaan shaqada, ballamaha ugana qaybgalaan howlaha madadaalooyinka ah. Si ay gacan uga gaysato la tacaalidda sicir bararka ballaaran ee jira, dowladda Alberta waxay soo saartay maalgalin dheeraad ah bishii Febraayo si dadka reer Alberta ee dakhligoodu hooseeyo u siiso adeeg gaadiid oo qiimo jaban.

Marka laga tago Edmonton iyo Calgary, 10 kamid ah xaafadaha Alberta ayaa leh marinada gaadiidka loogu tala galay dadka dakhligoodu hooseeyo. Ayaga oo isticmaalaya maalgalintan dheeraadka ah iyo si loo yareeyo caqabadaha hor taagan gaadiidka, dadka reer Alberta ee dakhligoodu yaryahay ee ku nool Camrose, Hinton, Leduc, Lethbridge, Red Deer iyo Spruce Grove waxa ay hadda awoodi doonaan inay dalbadaan in loo sameeyo waddooyin loogu tala galay dadka dakhligoodu hooseeyo.

“Dad badan oo reer Alberta ah ayaa ku tiirsan gaadiidka dadweynaha maalin walba. Heshiisyadaan cusub ee lagu ballaarinayo marinada gaadiidka loogu tala galay dadka dakhligoodu hooseeyo waxay shakhsiyaadka iyo qoysaska ka caawin doonaa inay si fudud xaafadahooda u dhexmaraan ayaga oo aan kharash badani ka bixin.”

Jason Nixon, Wasiirka Muwaadiniinta Waayeelka ah iyo Adeegyada Bulshada

Maalgalintu waxay si buuxda u dabooli doontaa kharashka dowladda hoose ku kaabayso barnaamijka gaadiidka loogu tala galay dadka dakhligoodu hooseeyo, oo ay ka mid tahay 10 boqolkiiba kharash

dheeri ah oo loogu talo galay maamulka. Tafaasiisha ku saabsan sida bulshadu ku heli karaan maalgalintan waxaa si toos ah loola wadaagi doonaa degmooyinka uqalma.

“Magaalada Camrose waxay bixisay xulashooyin gaadiidka dadweynaha ah bulshada sideedii sanno ee la soo dhaafay. Waxaan ka mahad celinaynaa taageerooyinka ay dowladda Alberta ku taageerayso barnaamijkeena, taasoo gacan ka gaysanaysa sidii gaadiidka looga dhigi lahaa mid muwaadiniinteenu awoodaan. Waxaan rajaynaynaa inaan xaafadaheena iyo gobolkeena kala shaqayno mustaqbalka sidii hanaanka gaadiidka gobolka loo hagaajin lahaa.”

PJ Stasko, duqa, Magaalada Camrose

Xaqiiqooyin kooban

- In ka badan \$14 milyan ayaa loo sii qorsheeyay marinada loogu tala galay gaadiidka goobaha ay ku noolyiin dadka dakhligoodu hooseeyo ee gobolka oo dhan, ok ay ka mid tahay \$6 milyan midkiiba Edmonton iyo Calgary si ay uga uhawlgaliyaan barnaamijyadooda.

Wararka la xiriira

- [Ka caawinta reer Alberta ee baahida qaba sidii ay ugu kala safri lahaayeen barta A ilaa B \(Febraayo 2, 2023\)](#)

Warbaahinta kala duwan

- [Daawo shirka jaraa'id](#)

Su'aalaha Warbaahinta

Heather Barlow

780-245-0421

Xoghayaha Warbaahinta, Dadka Waayeelka ah, iyo Adeegga Bulshada